Horumarka Ilmahaaga

Heerarka barashada ee sanad dugsiyeedka 2017-18

Washington waxay leedahay heerar barasho oo fasalka barbaarinta ilaa fasalka 12aad (K—12) kuwaasi oo qeexaya aqoonta iyo xirfadda arday kastaa u baahan yahay si uu ugu diyaargaroobo shaqada, kuuliyadda, iyo nolosha marka uu dhammaysto dugsiga sare.

Hoos waxa ku qoran tusaalayaal kooban oo kusaabsan ahdaafta barashada muhiimka ah ee Washington ee fasalka 2aad.
Macluumaad dheeraad ah, booqo:

www.YourChildsProgress.com

- **Fanka.** Sahaminta dhaqdhaqaaqa; kobcinta xirfadaha heesidda; muujinta xirfadaha bandhigis; sahaminta fanka sifaynta iyo qaababka.
- **Teknoolajiyadda Waxbarasho.** Kala qaybqaadashada macluumaad isdhaafsi arday ka socota meel kale oo Mareykanka ah.
- **Fanka Luuqadda Ingiriisida (ELA).** Fahmida fikradda muhiimka ah ee qoraallo kala duwan, kaqaybqaadashada wada-hadalka fasalka, iyo wax-u-qorista sababo iyo akhristayaal kala duwan.
- **Waxbarashada Caafimaadka iyo Jimicsiga.** Wax-ka-barashada nidaamyada jidhka iyo xidhiidhka ka dhexeeya habdhaqanka, doorashooyinka, iyo cidhif-dambeedyada si looga hortago xanuun iyo cudur.
- **Xisaabta.** Fidinta fahmida qiime rugeedka si la iskugu geeyo loona kala-gooyo ilaa 1000 iyo xallinta masalooyin iyada oo la isticmaalayo moodooyin iyo sawirro waaqici ah.
- **Sayniska.** Wax-ka-barashada kala-duwanaanta nolosha ee deegaan-nololeedyo (habitats), biyayowga (sida haraha iyo badaha) kala duwan, iyo sida dabaysha iyo biyuhu ay u beddeli karaan muuqaalka dhulka.
- **Cilmiga Bulshada.** Baadhista dhinacyada juqraafi iyo dhaqaale ee nolosha bulshada iyo sida bulshooyinku isku abaabulaan.

Washington sidoo kale waxay leedahay heerar barasho **qaabdhismeedyada iyo heerar qaybeedka Bey'adda iyo Waaritaanka la Isdhexgaliyey, Luuqadaha Adduunka, Waxbarashada Shaqada iyo Farsamada** (oo loogu talogalay dugsiga dhexe iyo dugsiga sare), **Fasiixnimada Luuqadda Ingiriisida** (ee ELA, xisaabta iyo sayniska), iyo sidoo kale tilmaamaha **Barashada Hore** (dhalashada—fasalka 3aad) kuwaasi oo kaaba waxbarasho si buuxda loo diyaariyey oo loogu talogalay ardayda oo dhan.

Waxbarashada gaarka ah: Ardayda hesha adeegyadu waxay helaan waafajino, qaab-geddisyo, iyo taageerooyinka lagu sheego qorshayaashooda waxbarashada shakhsi ahaaneed.

Bartayaasha luuqadda Ingiriisida: Ardayda barata ku-hadalka Ingiriisida waxay leeyihiin heerarka fasiixnimada luuqadda oo ka caawiya macallimiinta inay qorsheeyaan waxbarista maaddooyinka oo dhan kuwaasi oo ku habboon heerka luuqadda arday kasta.

Sebteembar 2017, Lambarka Soosaarista 17-0024

FASALKA 2

Ahdaafta Barashada Gobolka Washington

Sharci-dejinta Gobolka Washington waxay aasaaseen afar hadaf oo barasho si loo taago aasaaska koboca dhammaan heerarka barashada tacliimeed ee gobolka:

1. U akhriska si faham leh, u qoris si wax-ku-ool ah, oo u gudbinta si meelmar ah adoo adeegsanaya qaabab kala duwan kuna sugan meelo kala duwan una jeeda dad kala duwan;
2. Barashada iyo dabbaqidda aragtida iyo mabaa'diida muhiimka ah ee xisaabta; bulshada, duleed, iyo nololeed cilmiyeedka; waddaniyadda iyo taariikhda, oo ay kujiraan dhaqamada kala duwan iyo kaqaybqaadashada matalaada dowladda; juqraafiga; fanka; iyo caafimaadka iyo dhisnaanta;
3. U fekerida qaab falanqayneed, caqligal ah, oo halabuur leh, iyo isdhexgalinta qorista iyo ku-fiicnaanta farsamada iyo sidoo kale waayo-aragnimada iyo aqoonta kala duwan si loo qaabeeyo go'aano macquul ah loona xalliyo dhibaatooyinka; iyo
4. Fahmida ahmiyadda shaqada iyo maalgalinta iyo sida hawlqabadka, dadaalka, iyo go'aannadu si toos ah ugu saameeyaan fursadaha shaqo iyo waxbarasho ee mustaqbalka.

Xafiiska Kormeeraha Waxbarashada Dadweynaha
(Office of Superintendent of Public Instruction)
www.k12.wa.us

Imtixaanista Gobolka ee Washington

Sharciga federaalku wuxuu dhigaya in la imtixaano ardayda fasallada 3-8 sanad kasta marka dugsiga sarena laga qaado fanka luuqadda Ingiriisida (ELA) iyo xisaabta, iyo fasallada 5 iyo 8 iyo marka dugsiga sarena sayniska. Gobolka Washington sidoo kale wuxuu ka rabaa ardayda inay ka gudbaan imtixaano cayiman si ay u muteystaan inay ka qalinjabiyaan dugsiga sare.

Inta badan ardayda fasallada 3-8 waxay galaan imtixaanada **Smarter Balanced** ee ELA iyo xisaabta, iyo **Qiimaynta Dhammaystiran ee Washington ee Sayniska** ee fasallada 5 iyo 8. Imtixaanadaan waxa dhici karta in lagu qaato ama aan lagu qaadan qalab, taagyeerooyin, ama waafajino.

Ardayda qabta dhibaatooyin xagga garashada ah oo waawayn oo lagu diiwaangaliyo Barnaamijkooda Waxbarashada la khaasyeelay (IEP) waxay galaan qiimayn kale oo ELA, xisaabta, iyo sayniska ah, oo loo yaqaan Washington – Access to Instruction and Measurement (**WA-AIM**).

Imtixaanada gobolka qaado *marnaba* waa inaanu noqon waxa kaliya ee lagu go'aaminaayo xirfadaha iyo aqoonta tacliimeed ee ardayda. Haddii aad qabto su'aalo kusaabsan barashada ilmahaaga, fadlan la xidhiidh macallinka ama dugsiga ilmahaaga.

Ardayda barata ku-hadalka Ingiriisida ee fasallada barbaarinta ilaa fasalka 12aad waxay gali doonaan Qiimaynta Fasiixnimada Luuqadda Ingiriisida Qarniga 21aad (**ELPA21**). Qiimayntani waxay cabirta xirfadaha luuqadda Ingiriisida iyo korriinka sanadkii ee akhriska, qorista, dhageysiga iyo hadalka. Ardayda keena heerka fasiixnimada ee Soo Koraya (Emerging) ama Horumaraya (Progressing) ELPA21 waxay u-qalmaan inay helaan adeegyada taageerada barnaamijka luuqadda Ingiriisida.

Su'aalaha la Iska Waydiiyo Imtixaanista Gobolka

Waa maxay sababta uu ilmahaygu ugu baahan yahay inuu galo imtixaanada gobolka?

Imtixaanista gobolka waxa dhigaya shuruucda gobolka iyo federaalka. Ma aha sida kaliya ee loo ogaan karo sida ardaygu dugsiga ku yahay, laakiin waxay gacan ka gaysan kartaa aqoonsiga mushkiladaha barashada intaan wakhti badan dhicin.

Dugsiga sare, gudbista imtixaanada gobolka ama waxyaalaha halkooda gala ee la ansixiyo waxay muujiyaan ardaydu inay leeyihiin aasaas adag oo xirfadaha tacliimeed, halkay doonaan dugsiga ha ka dhigtaane ama waxay doonaan ha doortaan kadib qalinjabintooda.

Ma arki karaa imtixaanka ilmahayga?

Sababo ammaanka imtixaanka ah dartood, ardayda waxa laga yaabaa inayna kala hadal waxa ku qoran imtixaanada gobolka saaxiibada iyo qoyska. Hase yeeshee, qoysaska way u fasaxan yihiin inay soo fiiriyaan imtixaanada ilmahooda kadib marka la saxo.

Imtixaanada calaa Heer Fasal, 2017-18

	Barba-arinta	1aad	2aad	3aad	4aad	5aad	6aad	7aad	8aad
ELA				✓	✓	✓	✓	✓	✓
Xisaabta				✓	✓	✓	✓	✓	✓
Sayniska						✓			✓

Xusuus-qorrada:

- Qiimaynta Fasiixnimada Luuqadda Ingiriisida waxay daruuri u tahay ardayda baranaya ku-hadalka Ingiriisida. Ardaydu waxay u galaan imtixaanka si ay ugu qalmaan helitaanka taageero. Waxay sii wadaan galista imtixaanka, si sanadle ah, ilaa ay gaadhaan fasiixnimada luuqadda Ingiriisida.
- Imtixaano kale ayaa la rabaa, laakiin degmooyinku waxay leeyihiin waxoogaa dabacsanaan ah kala-doorashada imtixaanada iyo go'aaminta marka ardaydu galayaan. Imtixaanada waxa kujira akhriska fasalka labaad iyo imtixaanada fasalka kusalaysan ee culuumta bulshada, fanka, waxbarashada caafimaadka iyo jimicsiga iyo maadooyin kale. Macluumaad dheeraad ah waxa laga heli karaa linkiyada Maadada la Baranayo (Subject Area) http://www.k12.wa.us/assessment/default.aspx.
- Degmo dugsiyeedyadu sidoo kale waxa dhici karta inay rabaan imtixaano dheeraad ah. Ka hubi degmo dugsiyeedka deegaankaaga tafaasiil dheeraad ah.

Daaqadaha Imtixaanista Gobolka

Imtixaanista waxa lagu muddeeyaa daaqadaha hoos ku qoran gudahooda. La xidhiidh degmo dugsiyeedka deegaankaaga si aad u ogaato taariikhaha ilmahaagu imtixaanka gali doono.

DAAQADDA IMTIXAANISTA GOBOLKA

Febraayo 1– Maarso 30: **ELPA21**

OSPI waxay bixisaa warbixino buundo dhammaan imtixaanada sare ku qoran. La xidhiidh degmo dugsiyeedka deegaankaaga si aad u hesho macluumaad dheeraad ah.

Maxay ka Dhigan Yihiin Dhibcaha Imtixaanka Gobolku?

Heerka **4** — **Dhaafay Heerarka la Rabo:** Muujiyay horumar sare oo ku aaddan yeelashada aqoonta iyo xirfadaha maaddada.

Heerka **3** — **Gaadhay Heerka la Rabo:** Muujiyay horumar ku aaddan yeelashada aqoonta iyo xirfadaha maaddada.

Heerka **2** — **Ugu Dhawaan Gaadhay Halka la Rabo:** Waxa dhici karta inuu u baahan yahay kobcin dheeraad ah si uu u muujiyo aqoonta iyo xirfadaha maaddada.

Heerka **1** — **Aan Gaadhin Heerka la Rabo:** U baahan wax la qabasho wayn si uu u muujiyo aqoonta iyo xirfadaha maaddada.

Office of Superintendent of Public Instruction
Old Capitol Building
P.O. Box 47200
Olympia, WA 98504-7200

www.YourChildsProgress.com

Sebteembar 2017, Lambarka Soosaarista 17-0024